

Xeer Madaxwenaha Jamhuuriyada lamba. 164 ee 19 Luulyo ee 1966

Xadeynta Ganacsiga lala Leeyahay Dalka Kenya

MADAXWEYNAHA JAMHUURIYADDA

Kadib markii la arkay faqradda 2aad ee qod. 63 ee Dastuurka;
Kadib markii la arkay qod. 20 ee sharciga lamba. 14 ee 3 Juun 1962 iyo wax ka beddelidda xeerarka Dowladda;

Kadib markii la arkay qodobada 2 iyo 85 ee dekreetada sharci lamba. 12 ee 26 Setembar oo loo bed soo saaroxeerar sharacaaya xeendabyadah xeerin doono xiriirka howlgallada dhaqaale ee la mid ah kuwa dowladaha kale lagu dabaqo;

Kadib markii la dhegeestay aragtida Bangiga Dhexe ee Somaliya;

Kadib markii la dhegestay soo jeedinta Wasiirka Maaliya;

Kadib markii la tixgeliyey aragtida Golaha Wasiirka.

WAXAA LA SOO SAARAY

Qod. 1

Joojinta Xiriirka wax ka Keenista

Kadib markii laga reebay marxaladah ku qoran qod. 3 waxaa la joojiyey in si toos ah ama dadban laga soo wariyo alaab dalka Kenya oo ay ka mid yihiin kuwa safar ku ah iyo shaqaalaha ka shaqeeyo howlahaasi.

Qod. 2

Joojinta wax geynta

Waxaa kadib markii laga reebo marxaladaha ku qoran qod. 4 la joojiyey in la geeyo alaab dalka Kenya, xatta alaabta safar ku si ah iyo shaqaalaha la xiriira howlahaasi.

Qod. 3

Marxaladaha ka reeban joojinta keenista alaabta

Amarrada ku qoran qodobka 1 ee Dekreetadana laguma dabaqi doono marxaladaan hoos ku qoran:

- a) Keenista qalabka ama alaabta si shaqsi loo leeyahay (oo ay ku jiraan baaburta, qalab, makinadaha beeraha, cagaf-cagafyo iyo rimoorkooda oo loogu tala galay isticmaal cidda iska leh), xoolo noono oo shaqsi leeyahay oo safar ku ah ama ku sugan Somaliya;
- b) Keenista nooc kasta oo alaabta oo ay leeyihiin dad si caadi ah u deggen Somalia kuwaso la guddon sin doono muddada lagu carifay qodobka 5 ee dekreetadaan;
- c) Warqadaha iyo qorallada sida ku carifan Heeshiska caalamiga ee boostada;
- d) Keenista qalabka sayniska ama suggaanta ee hey'adaha aqoonta oo la aqbalay iyo Masxafyada yo hey'adaha dhaqanka oo la aqoonsan yahay;
- e) Alaab kasta oo Wasiirka Warshadaha iyo Ganacsiga oo xeer gaara ugu oggoladay dekreetadiisa.

Qod. 4
Marxaladaha laga reebay joojinta dhoofinta alaabta

Amarrada ku tixabn qodobka 2 ee Dekreetadan ma lagu dabaqi doono marxaladahaan:

- a) Dhoofinta alaabta sida gaarka loo leeyahay (sida baaburta, qalabka beeraha, cagaf-cagaf iyo rimoorkiisa oo loogu tala galay isticmaalka shaqsiga iska leh xoolo noono oo shaqsi leeyahay oo safar ku ah ama ku suggan Somaliya;
- b) Dhoofista nooc kasta oo alabta oo ay leeyihiin dad si caadi ah u deggen Somalia kuwaso la guddon sin doono muddada lagu carifay qodobka 5 ee dekreetadaan;
- c) Dhoofista sanduuqyada, oo si hadiyya ah loogu keenay oo aysan ku jirin alaab beec ah;
- d) warqadaha iyo qorallada sida ku carifan Heeshiska caalamiga ee boostada;
- e) Dhoofista qalabka sayniska ama suggaanta ee hey'adaha aqoonta oo la aqbalay iyo Masxafyada yo hey'adaha dhaqanka oo la aqoonsan yahay;
- f) Alaab kasta oo Wasiirka Warshadaha iyo Ganacsiga oo xeer gaara ugu oggoladay dekreetadiisa.

Qod. 5
Hirgalka Sharcigaan

Dekreetadana waxay hirgeli doonta laga bilaabo 22 Juun 1966 mana khuseyso howlahii la dhameeystiray ka hor taarikhdaansi ama ku si ka maran qayaan la fuliyey inta u dhexeysa 22 Juun iyo muddada uu sharciga la faafiyey si rasmi ah.

Muqdisho, 19 Luulyo 1966.

Aden Abdulle Osman

Rai'sul Wasaaraha

Abdirizak Haji Hussein

Wasiirka Warshadaha iyo Ganacsiga

Abdirixak Haji Hussein